

**Amarka lamba. 13 rep**

**U xilsaaridda garsooraha gobolka ee guddoomiyaha maxkamadda gobolka.**

## **MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

### **MAAMULHU**

Marka uu arkay Xeerka 9 Dicember 1952, lamba. 2357;

Marku uu arkay qod. 17 xeerka xeerka nidaamka garsoorka la socda oo lagu meelmariyay r.d ee 20 Juun 1935, lamba. 1638;

Marka uu garawsaday habboonaanta in la hubiyo mabadiida madaxbanaanida garsooraysha ay ka madaxnannanyihiin awoodda siyaasadeed oo ah uu iska dhigo-baddalo guddoomiyaha maxkamadda gobolka, kaasoo waqtiga xaadirka ah Madax Gobolka ayna u wehliso garsooraha Gobolka;

Marka uu arkay Qod. 8 ee Heshiiska Ilaalinta Dhulka Soomaaliya;

Marka uu arkay qod. 4 Bayaanka mabadiida dastuuriga eek u lifaaqan Heshiiska Ilaalinta;

Marka uu arkay qod, 4 ee Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 22 9 Dicember 1962, lamba. 2357;

## **WUXUU AMAR KU BIXINAYAA**

### **Qod. 1**

Maxkamadda gobolka sida ku xusan qod. 17 iyo kuwa ku xiga ee xeerka nidaamka garsoorka jira waxaa joogsanaya guddoomiyanimadii uu ka ahaa madaxa gobolka; iyada waxaa madax ka noqnaya garsoore gobol.

### **Qod. 2**

Qod. 6 ee amarka 7 ee 22 Maajo 1953 waa la tirtiray.

### **Qod. 3**

Amarkaan wuxuu dhaqangalayaa 1 Oktoobar 1954.

Muqdisho, 2 Agoosto 1954.

Maamulaha

**Martino**